

KELI KU AH GURIGA:

Miyuu
canugaaga
diyaar u
yahay?



Waalid ahaan, waxaa jiro wakhti markii aad bilawdid inaad tixgeliso haddii canugaaga uu yahay da' ku filan, qaan gaar ku filan, oo jir ahaan diyaar u ah inuu guriga keligii joogo.

Go'aaminta marka uu canugaaga diyaar u yahay inuu keligiis guriga joogo waxay noqon kartaa caqabad. Adiga ayaa canugaaga si fiican uga garanayo qof walba, sidaas awgeed waxaan diyaarinay hage kaa caawinaya adiga iyo canugaaga inaad go'aansataan haddii ay tahay wakhtiga ku haboon ee aad qaadaan masuuliyadaan cusub ee xiisaha leh.

Action for Children



Qodobbada La Tixgeliyo



Rabitaanka: Tixgeli kalsoonida canugaaga, heerka raaxo gelinta iyo rabitaanka guriga loogaga tago keligood.

Badqabka: Tixgeli badqabka deriskaaga.

Masuuliyada: Miyuu canugaaga raacaa xeerarka, samee go'aano fiican oo faham inay jiraan cawaaqibo fiican iyo kuwa xun oo dooqyadooda ah?

Wagtiga: Tixgeli dherirka wakhtiga iyo inta jeer ee canugaaga keligiis looga tagayo. Miyuu canugaaga garanayaa lambarkaaga taleefonka iyo sida loo isticmaalo taleefonka?

Goobta: Miyaa adiga ama qof kaloo weyn oo lagu kalsoon yahay lala soo xiriiri karaa oo si degdeg ah guriga ugu noqon karaa haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah?

Diyaarsanaanta Liiska warbixinta

Su'aalaha La Weydiiyo

haa maya

Miyuu canugaaga xiri karaa oo furi karaa albaabbada?		
Miyuu canugaaga garanayaa lambarkaaga taleefonka iyo sida loo isticmaalo taleefonka?		
Canugaaga ma akhrin karaa, ma sheegi karaa wakhtiga, oo ma raaci karaa tilmaamaha?		
Miyuu canugaaga yaqaanaa goorta iyo sida loo waco 911 oo sheegi karo magacooda, ciwaankooda iyo lambarka teleefonkooda haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah?		
Miyuu canugaaga si joogto ah u isticmaalaa xukun wanaagsan iyo xirfadaha xalinta qilaafaadka?		
Miyuu canugaaga garanayaa habraacyada aasaaska badqabka iyo sida looga jawaabo (gargaarka degdega ah, digniinaha qorshaha ka guurista cimilada, guriga la xiriirto)?		

Gobolka Ohio ma qeexo da'da uu canuga sharci ahaan joogi karo guriga keligiis. Khubaradu waxay soo jeedinayaan in canuga aan kaligiis looga tegin illaa da'da 12 jir.

Talooyinka Guusha



Xeerarka: Kala shaqee canugaaga si aad u abuurto xeerar ay fahmi karaan oo ay raaci karaan:

- Samee wakhti aad ku wacdo oo aad ku hubiso maalin kasta
- Go'aanso haddii loo oggolyahay inay ka tagaan guriga ama ay u soo geliyaan saaxiibo guriga
- sida iyo goorta si badqab ah looga jawaabo albaabka ama telefoonka
- cidda ay wacayaan ama waxa ah inay sameeyaan haddii ay dhibaato jirto



Jadwalada: Samee jadwal qaabeysan oo canugaaga raaci karo maalin kasta:

- Waqti u samee cunugaada oo uu kula hubiyo marka ay guriga yimaadaan
- U diyaari cunto fudud ama cunto caafimaad leh oo ay cuni karaan iyadoon wax la karin
- U samee jadwal aad ku qeexdo waxa ah in la sameeyo inta ay guriga joogaan (layliga guriga, shaqada guriga, wakhtiga shaashadda, intarneetka iwm.)

Tababarka: Sida xirfad kastoo cusub, waa muhiim in lala tababarto canugaaga ka hor inta aadan uga tagin muddo dheer guriga keligood:

- Sii canugaaga xaaladaha waxyaabaha suurtoogalka ah ee laga yaabo inay dhacaan markii ay keligood guriga joogaan. Tan waxay ka caawineysaa inay kalsooni ka helaan go'aan qaadashadooda oo ay oggaadaan waxyaabaha aad ka filanayso.
- Ku tababar guri uga tagida keligood oo waqti muddo gaaban (aad shaqo degdeg ah, aad guriga deriska). Si tartiib ah u kordhi wakhtiga aad ka maqantahay illaa aad labadiinaba ku kalsoontihiin inay diyaar yihiin.
- Ku samee garaacida degdeg ama lambarada taleefonka muhiimka u ah barnaamijka taleefonka uu canugaaga isticmaalayo oo ku tababar sida iyo goorta la sameeyo wacitaanadaas.



XIRIIRKEYGA:

Macluumaadkeyga (Macluumaad Muhiim ah ee Meesha Aan ku Noolahay):

CINWAANKA

LAMBARKA TELEEFONKA

QORAALADA

Macluumaadka Xiriirka Muhiimka ah (Hooyo, Aabbe, Eedo, Adeer, Awooweyaal):

MAGACA

LAMBARKA TELEEFONKA

QORAALADA

Xiriirada Degdegga ah (Deriska, Saaxiibada, Adeegyada Gurmada):

MAGACA

LAMBARKA TELEEFONKA

QORAALADA

Haddii aad go'aansato in canugaaga uusan diyaar u aheyn inuu keligiis guriga joogo, waan ku caawin karnaa. Nala soo xiriir. Shaqaalaheena ayaa kaa caawin kara raadinta daryeelka canugaaga iyo waxbarashada hore oo taleefon ama intarneet ahaan. Kan waa adeeg BILAASH AH!

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH:

Soo wac: 614-224-0222

I-meelka: childcareresources@actionforchildren.org

Booqo: www.actionforchildren.org



Action for Children



Franklin County
Board of Commissioners
**JOB & FAMILY
SERVICES**



Department of
Children & Youth